



August 26, 2017

Maamulka Guryaha Dadweynaha ee Minneapolis (MPHA) Talaabooyinka Barakicinta

Fariinta MPHA ee Deganayaasha:

- Gurigaadu wuxuu u kala daadanayaa si aan ishaadu qaban kareynin (waxay muujinayaa muqaalo naxdin leh).
- Lama heli karo lacag dadweyne oo lagu dayactiro.
- Si bedqabnaanta gurigaada loo ilaaliyo, waa in la bahownaa maalgashadayaal khaas ah iyo shirkado waaweyn.
- Waxaan ku dadaaleynaa in aan lagu barakicin, laakin balanqaad ma jiro.
- Hadii aan idin guurino dayactir awgeed, waa idin soo celineynaa – “hubaal soo celin ah”
- Maxaa runtii arintani macnaheedu yahay? Ka eeg hoos sida ay MPHA ay u barakicineyso deganayaasha.

“Mabaadi’da hagaysa dib-u-hormarinta maalgashiga dhaqaale ee MPHA” uu anxiyay gudiga gudoomiyayaasha MPHA bishii May 24, 2017 waa qorshaha Gregory Russ kaa soo ka raraya deganayaasha guryaha dadweynaha una raraya guryaha gaarka loo leeyahay talaabooyinkan soo socda:

- Deganayaashu way baxayaan, MPHA waxay ku dayactireysaa daaraha lacag gaar loo leeyahay ka imaanaysa iskaashi khaas ah.
- Deganayaashu waa in ay u qalmaan in ay ku soo noqdaan iyadoo la eegayo dakhliga ay sameeyaan.
- Badnaanta dakhliga, waxay kordhineysaa fursad in deganayaashu dib ugu soo noqdaan.
- Deganayaashu dib uma bixin doonaan 30% dhakhli bileedkoodu. Waxay bixin doonaan kiro ka badan.
- Si aad ugu qalanto in dib laguugu soo celiyo daarahan la dayactiray, deganayaashu waa in ay sameeyaan 30% ilaa 60% dakhliga dhexdhexaadka deegaamada Minneapolis-St. Paul Bloomington (AMI).
- Eeg bogga 4aad warqadda ay MPHA u dirtay deganayaasha iyadoo an la tarjumin. <http://tinyurl.com/MPHA-Resident-Ltr>.
- Waa maxay dakhli dhexdhexaadka deegaanka? Waa celceliska dakhliga qoysaska magaaladaada iyo deegaamada ka hareereysan.
- Dakhli dhexdhexaadka qoys ka kooban afar ee magaalada Minneapolis waa \$85,500.
- Dakhli dhexdhexaadka qoysaska madow ee Minneapolis waa \$30,300 sanadkii.
- Celceliska dakhliga deganayaasha guryaha dadweynaha waa \$20,656 sanadkii.
- MPHA waxay yeelanaysaa dhulka lakin ma yeelaneysa daarahan. MPHA waxay noqoneysaa lamaane aamusan halka ay horumariyaasha khaaska ah la wareegayaan kirooyinka.
- Horumariyaashani maku dalaci doonaan kiro deganayaasha 30% dakhli biloodkooda, taas ah tan kaliya ay deganayaashu aboodaan dakhli-yaraantooda awgeed.
- Shaxda cusubi, deganayaashu waa inay sameeyaan inta u dhexeysa 30% ilaa 60% ee \$85,500 sanadkii si ay ugu qalmaan in dib loogu soo celiyo daarahan.
- Deganayaasha guryaha dadweynaha ma aboodi doonaan in dib loogu soo celiyo daarahan sababtoo ah ma samaynayaan daqli ku filan. Deganayaashu uma qalmaan, daaruhuna ma sii ahaan doonan guryo dadweyne.
- Aan xisaabino waxa tani la micno tahay:
30% (\$85,500 yearly income x.30=\$25,650)

- Deganayaashu waa in sameeyaan ugu yaraan \$25,650 dakhli saneeed taasi oo ah \$2137.5 bishii
- 60%, (85,500 x.60= \$51,300) \$51,300 a year which is \$ 4,275 per month

MPHA ayaa sheegaysa in deganayaasha guryaha dadweynaha la soo celinayo. Arintaasi waa been. Deganayaashu kaliya waxa ay ku soo noqon karaan hadii ay u qalmaan. Deganayaasha guryaha dadweynaha uma qalmaan sababtoo ah ma samayn doonaan dakhli ku filan ay ku debaan kirada. MPHA si fudud ayay lacag u heli kartaa si ay ugu dayactirto oo guryaha dadweynuhu u sii ahaadaan guryo dadweyne iyadoo loo marayo maalgashiga magaalada iyo statekaba. Hadaba, agaasimaha fulinta MPHA ee cusub Gregory Russ ayaa ka soo horjeeda miisaaniyadda dadweynaha. Wuxuu doonayaa in uu eebiyo guryaha dadweynaha gebi ahaanba qorshihiisa. **“Mabaadi’da hagaysa dib-u-hormarinta maalgashiga dhacaale ee MPHA”.** qorshahani waxaa ka mid ah, Iskaashata khaas ah ayaa la wareegi doonta guryaha dadweynaha/dhulka bilaash iyadoo loo marayo deynta cashuura guryeynta dakhliga hooseedyada sababtoo ah horumariyayaashan gaar ah waxay isha ku hayeen guryaha dadweynaha tobaneeoyo sano in ay tahay suuragal horumarinada cusub si faaido looga helo.

XOG CUSUB

Waa kuwama xulafada Gregory Russ iyo Horumariyayaasha?

- Xulufadan waxaa ka mid ahaa Duqdii magaalada Betsy Hodges taasoo riixaysay qorshayaasha horumarinta ee magaalada tan iyo markii ay ahayd xubin golaha deegaan ilaa duq magaalada. Duqda magaalada Hodges ayaa ansixisay shaqaaleynta Gregory Russ.
- Xubin deegaan Lisa Godman iyadana way ansixisay shaqaaleynta Gregory Russ. Iyaduna waxay xulufo muhiim ah u tahay horumariyayaasha Minneapolis. Sidoo kale waxay gudoomisaa gudiga horumarinta bulshada iyo adeega sharciyada kaasoo kormeera iibinta hantida dadweynaha horumariyayaasha gaarka ah.
- Barb Johnson, madaxweynaha golaha deegaanta iyo kuwa kale oo ka mid ah xubnaha aamusan. Xulafada sidoo kale waxaa ka mid ah xubaha gudoomiyayaasha ee MPHA ay magacowday Lisa Godman iyo qaar ka mid xubnaha golaha deegaanka. sida:
 - Gudoomiye F. Clayton Tyler kaa soo ah shirkad sharci oo gaar loo leeyahay taasoo u ololeysa horumariyayaasha sida Sherman Associates.
 - Gudoomiye Chuck Lutz waa gudoomiye ku xigeenka xubnaha MPHA iyo agaasime ku xigeenka waaxda qorsheynta bulshada iyo horumarinta dhacaalaha Commissioner ee magaalada Minneapolis (CPED) CPED waxay kormeertaa gebi ahaanba mashaariicda horumarineed lana shaqeysaa si toos ah guddiga hoos yimaada Lisa Godman.
 - Gudoomiye Thomas J DeAngelou kaasoo ah dhise madaxbanaan oo caan ah.
 - Gudoomiye Cara Letofsky taasoo maamusha shirkad la talin ee gaar loo leeyahay oo u adeegta horumariyayaasha.
 - Gudoomiye James Resenbaum ka soo maamulay burburintii guryahay dadweynaha ee waqooyiga Minneapolis sagaashamaadkii ee loo marayay amarkii Hollman.

MPHA iyo xulafadoodi muhiimka ahaa way qariyeen qorshayaashan kuna guuldareysatay in ay u daahfurnaadaan deganayaasha guryaha dadweynaha iyo muwaadiniinta Minneapolis. Natiijo ahaan, hadii qorshayaashan la ansixiyo, 26 kun oo deganayaasha ah ayaa loo barabixinayaa talaabo taalabo sanad kasta laga bilaabo 2018. Guryeynta dadweynaha ee Minneapolis way dhamaanaysaa. Bulshooyin dhan oo burbura iyo guri-laawayaashana waa afar jibaarmeysaa.

Ilaha qoraalka:

- [US Department of Housing and Urban Development](#) [Pioneer Press National Housing Law Project](#)
- [Minnesota Housing Finance Agency](#) [University of Minnesota CURA](#)
- <http://mphaonline.org/housing/programs/high-rise-buildings/> <http://tinyurl.com/Citywide-Public-Housing>
- <http://tinyurl.com/All-Public-Housing-Highrises>
- <http://tinyurl.com/MPHA-Resident-Ltr> <http://tinyurl.com/MPHA-Plans-4-2017>
- <http://tinyurl.com/LIHTC-in-MPLS> <http://tinyurl.com/DGC-on-MPHA-Paths-to-Presv>
- <http://tinyurl.com/Committee-Action-11-29-16> <http://tinyurl.com/DGC-Fact-Check-6-17>

Waad Mahadsantihiiin

Defend Glendale & Public Housing Coalition (Difaaca Glendale & Guryaha Dowladeed)

defendglendale@gmail.com [facebook@defendglendale](https://www.facebook.com/defendglendale)

[twitter@defendglendale](https://twitter.com/defendglendale) P.O. Box 14616, Minneapolis, MN 55414